

UJEEDO: WAKAALAD GAAR AH "PROCURO DE SPECIALE"

Maanta oo ay taariikhdu tahay **10/09/2025**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Taajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

WAKAALAD BIXIYE:- MUHAMMED MOALLIM ISAQ, Ina Suldaano Abubakar Qeylshe, Somali ah, Ku Dhashay: Jamaame, Sanadkii: 01/10/1957, Sita: British Pass. Lr. 130325557

LA WAKIISHE:- MOHAMED AHMED YUSUF, Ina: Xaliimo Cabdulle Maxamed, Somali ah, Ku Dhashay: Beledweyne, Sanadkii: 01/07/1966, Degan Dharkeynley, Sita: Somali Passport, Lr. P01020148

TILMAAMAHA DHULKA

Dhul Banaan oo Ku yaal: **Muqdisho**, Degmada: **(Dharkeynley)**, Cabirka: **(20X20-Mt)-M**, Looto No: **2622**, W.M.L: **(Lr.294/2009)**, **Tr. 14/6/2009**, Kana Soo Baxday Maxkamadda Degmada Wadajir, ayna wada saxiixeen Garsooraha Maxkamadda Dr.Xuseen Maxamed Calasow, iyo Kaaliye: **Sacdiyo C/laahi Maxamed**

SOOHDINTA DHULKA

Bari: dhul dad, Koonfur: **Jid**, Galbeed: **jid**, Waqooyi: dhul dad

B- Aniga oo ah **MUHAMMED MOALLIM ISAQ**, Waxaan qoraalkaan ku Cadaynayaa Aniga oo Maskaxda iyo Caqligaba ka fiyow Cid I qasabtayna aysan Jirin in aan Wakiishay **MOHAMED AHMED YUSUF** Una Wakiishay Wakaalad Gaar ah, oo Ku Saabsan Dhulka Tilmaamihisu Sare Ku Xusan yihiin, in Dhulkaas uu gadi karo, Wareejin Karo, Hibeyn karo, dhisi karo, ijaari karo, u dacwoon karo, qareen u qaban karo, uguna doodi karo Maxkamadaha dalka hortooda, Waxaan mar kale sii caddeynayaa in **MOHAMED AHMED YUSUF** awoodaas aan siiyay uu u madax banaan yahay oo aniga dhulkaas aan soo sheegay ka macaamilidiisa wax la iiga baahan karo aysan jiri doonin.

T- Aniga oo ah **MOHAMED AHMED YUSUF**, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan aqbalay Wakaalada uu isiiyey **MUHAMMED MOALLIM ISAQ**, islamarkaana aan Xilkaas aan ugu Soo Bixi doono Si Hufan oo Shareecada Islaamka Waafaqsan Insha Allah.

SAXIIXA WAKAALAD BIXIYAHA

MUHAMMED MOALLIM ISAQ

Muhammed

SAXIIXA LA WAKIISHAHA

MOHAMED AHMED YUSUF

Mohamed Ahmed Yusuf

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1- MOHAMED ALI ADAN

Mohamed Ali Adan

2- ABDULLAHI ALI ABDILLE

Abdullahi Ali Abdille

(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP. 1814/T.P.N/25, Tr. 10/09/2025, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee **1- MUHAMMED MOALLIM ISAQ** Ahna (Wakaalad Bixiye), **2- MOHAMED AHMED YUSUF** Ahna (La Wakiishe) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Wakaaladaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaa Loo Aqriyey Nuqul.

By: RICHABDULLI

NOOTAAYAHA

Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"



Signature of Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"





- JAMHUURIYADDA

Soomaaliya -

Tr. 294/2009,

~~Maxkamadda Degmadda Wadajir~~

UJEEDDO:- Beec Dhul. =

Tr. 14/6/2009, :

MUXUMAD CABDULQAADIR IBRAAHIM:- Soomaali ah D.X. (Milkiile):

Wuxuu Iska iibiyey Dhulkiisa Banaan ee Ku Yaalo Xamar: Deg.

Dharkintan/Dh: 20X40- Mitir. Lotto: No: 2622-2618.-ZA.- WLL.

71/1/2008, ee Tr. 11/6/2008, ee ka soo Baxdey Dowladda Hoose

ee Xamar: Soohdintiisu Tahay: Bari Jid; Galbeed Dhul Dad; Waqooyi

Jid; Koofur Dhul Dad; Wuxuu ka iibiyey Dhulkiisa Asagoo Fayoow

uu Xiskiisu Taam Yahay: MUXUMAD MAC. ISAAQ - CUSMAAN. Soomaali ah

Deg. Xamar; Wuxuuna uga iibsadey Lacag Dhan USA: 2800/ Doolar.

(Waa Labo Kun; Iyo Sideed Boqol oo Doolar): Dhamaana Lacagtaas

Waxaa la siiyey Iska ~~Dhulkaas~~ Gedaha Dhulkaas, Waa Sida uu Ka

Qirtey Maxkamadda Horteeda; Ninka Gateyna uu Raali ka ahaa.....

Sidaas daraadeed Milkigii Dhulkaas Wuxuu u Wareegey oo Iibsadey

ee Iska Leh Maanta Wixii ka Dambeeyo: Muxumad Mac. Isaaq Cusmaan.

Waana Beec Dhul Ansax ah ee Waafaqsan Shareecada Iyo Qaanuunka;


Maxkamadu Waxay ku Qortey Buugga Guud. Waxaana Marag ka ahaa Beeca

Dhulkaan; 1)- Cabdullaahi Maxamed Cabdulle; 2)- Axmed Daahir Yuusuf.

3)- Axmed Taajiir Sh. Maxamed; 4)- Cali C/lle. Xasan.....


.KAALIYAHA MAXKAMADDA.

Saadiyo C/Laahi Maxamed



GARSOORAHA MAXKAMADDA

Dr. Xuseen Maxamed Calasow.





FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 03/12/2025

Aniga oo ah **Maxamed Cabdi Cali** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **MAXAMED AXMED YUUSUF** Dukumiintiga **Original** Wakaalada Gaarka ah **Rep No. 1814/T.P.N/25, Tr. 10/09/2025**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca La Wakiishaha	MAXAMED AXMED YUUSUF
La Wakiishay	Dhul
Cabirka	20X20
Ku Yaallo	Muqdisho, Degmada Dharkeynley
*Lotto Lambar	2622
W.M.L	294/2009, Tr. 14/06/2009 Maxkamada Degmada Wadajir
Taariikhda Wakaalada	10/09/2025

La Wakiishe: Aniga oo ah **MAXAMED AXMED YUUSUF**, Leh Tel No. **0614400744**, Degan **MUQDISHO** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaatay Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Wakaalada faah faahinteedu Sare ku cadahay.

Sawir

SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Maxamed Cabdi Cali

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

MAXAMED AXMED YUUSUF